

Helsinki

Macluumaadka waalidka loogu talaggalay ee waxbarashada af finnishka oo sidi luqad labaad ah (S2) ee dugsiyada hoose-dhexe



Tusmada

Gogoldhig	3
Waxbarashada taageereysa horumarka aqoonta luqadda ..	3
Xulashada cadadda waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta	4
Waxbarashada, la socoshada aqoonta luqadda iyo beddelista cadadda waxbarashada	5
Cadadda waxbarashada S2 ee ku jira qorshaha waxbarashada	6
Hababka hirgelinta waxbarashada S2	6
Luqado badnaanta dugsigga dhexdiisa	7
Doorka waalidiinta ee taageeridda aqoonta luqadda	8
Sare u qaadidda afkaada	8

Gogoldhig

Hagahan wuxuu waalidiinta ardayda reer Helsinki siinayaa macluumaad ku saabsan waxbarashada afka finnishka ee sida luqada labaad ah ee dugsiga hoose-dhexe.

Wuxuu jawaabo ka bixinayaa su'aalaha ay ka midka yihiin kuwaan soosocda:

- Maxaa loola jeeda waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah?
- Maxay tahay sababta loo cuskanayo in ardayda loo soojeediyo ka qabyqaadashada waxbarashada S2?
- Sidee ayaa waxbarashada S2 loogu qabanqaabiyay dugsiyada?
- Sidee ayeey waalidiintu u taageeri karaan horumarka luqada carruurtooda?

Habraacyo iyo macluumaadyo kuwan lamid ah ayaa waxay sidoo kale quseeyaan waxbarashada iswiidhishka ee sidi luqad labaad ah ee dugsiyada reer Helsinki, farqigu waa, in luqada lagu baranayo S2 ay tahay isiwiidhish.

Waxbarashada taageereysa horumarka aqoonta luqadda

Dugsiyada hoose-dhexe ee ku baxa afka finnishka iyo afka iswiidhishka waxaa laga bixiyaa waxbarasho marka bixinteeda lagu jiro si gaar ah fiiro loogu yeesho baahiyaha waxbarasho ee ardayda luqadaha badan iyo dalka u soo guuray. Waxbarashada noocaas ah waa tusaale ahaan waxbarashada diyaarinta ah, waxbarashada afka hooyo iyo waxbarashada afka finnishka oo sidi luqad labaad ah, taas oo ay xirmadan macluumaadka ah si gaar ah xoogga u saarayso. Waxaa intaas dheer oo barashada luqada lagu horumarinayaa marka lagu jiro barashada maaddooyinka kala duwan tusaale ahaan ballaarinta keydka erayada iyo barashada aqoonta qoraallada kala duwan.

Waxbarista u diyaarinta ah

Waxbarashada diyaarinta ah waxaa lagu haggaa ardayda ay aqoontooda luqadeed ee afka finnishku/iswiidhishku ka hooseeyso aqoonta luqada billowga ah (A1). Waxbarashada waxaa lagu haggaa kuwa mardhow Finland u soo guuray iyo haddii loo baahdo iyadoo lagu salaynayo aqoonta luqadeed kuwa carruurta Finland ku dhalatay. Waxbarashada diyaarinta ah waxay wakhti ahaan u dhigantaa cadadka waxbarashada ee hal sannad-dugsiyeed. Inta waxbarashadaas lagu jiro waxaa la baranayaa luqada finnishka iyo aqoonta kale ee dhigashada dugsiga. Haddii uu diyaar yahay, ardaygu wuxuu u wareegi karaa waxbarasho-horaadka ama waxbarashada aasaasiga ah kahor inta aanu sannadku dhammaan.

Waxbarashada afka hooyo

Waxbarashada afka hooyo waa waxbarasho dhammaystir ah, taas oo uu heli karo ardayga uu afkiisa yahay luqad kale oo aan ahayn finnish ama iswiidhish. Hadafka waxbarashada afka hooyo waa in aqoonta afka hooyo loo xoojiyo hab ah, in ardaygu uu awoodo in uu iyada wax ku barato iyo in uu habab dhinacyo badab u isticmaalo. Waxaa wanaagsan in waalidku uu cunugga la isticmaalo luqadiisa xooggan iyo in uu cunugga ku dhiirigeliyo barashada luqadaha oo dhan.

Waxbarashada S2

Finnishka sidi luqad labaad ah iyo cadadda suugaantu waa hal cadad oo maadada afka finnishka iyo suugaanta ah. Waxaa waxbarashadaas lagu haggaa ardayda ay aqoontooda afka finnishku horumartay, laakiin aan weli ku filnayn, in ardaygu uu finnishka u barto sidi afka hooyo oo kale. Waxbarashada S2 waxay aqoonta afka finnishka ee ardayga u xoojisaa qaab ah, in uu wax u qabto islamarkaasna wax u barto si lamid ah sida ardayda kale. Waxbarashada S2 waxay taageertaa ka faa'iidayashada luqadaha kale ee uu ardaygu yaqaan marka lagu jiro barashada afka finnishka iyo maaddooyinka kale.

Waxaa xiga oo aad heleysaa macluumaadka rasmiiga ah ee ku saabsan cadadda barashada finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo arrimaha kale ee la xiriira luqado badnaanta ee dugsiga.

Xulashada cadadda waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta

Afka hooyo iyo suugaantu waa maaddo ay si wadajir ah u qaataan dhammaan ardaydu. Maadadu waxay leedahay cadad waxbarasho oo kala duwan. Mid kuwaas kamid ah waa luqada finnishka iyo suugaanta (S1) tan labaadna waa finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta (S2). Waxaa kale oo Helsinki lagu bixiyaa cadadda waxbarashada luqada dhagoolaha iyo suugaanta. Ardaygu wuxuu inta badan bartaa cadadda waxbarasho ee S1 ama S2.

Yaa loogu talagalay S2?

Cadadda waxbarashada afka finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta (S2) waxaa loogu talagalay ardayga:

- 1) uu afkiisa hooyo yahay luqad aan ahayn finnish, iswiidhish ama saami ama arday asal ahaan leh taariikh luqado badnaan iyo
- 2) aanay aqoontiisa finnishku aanay ku filnayn barashada cadadda waxbarashada afka finnishka iyo suugaanta ama
- 3) ay aqoontiisa luqadu qabyo ka tahay mid kamid ah qaybaha luqada (qaybaha luqadu waa fahamka hadalka, ku hadlidda, qoritaanka iyo fahamka qoraalka).

Macallimiinta ardayga waxbara waxay si wadajir ah u gaarayaan go'aanka ku saabsan, in ardayga loo soo jeediyo qaadashada cadadda waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah. Si kastaba ha ahaatee waalidka ayaa gaaraya go'aanka cadadda waxbarashada.

Waa maxay waxa saameeya soojeedinta iyo xulashada waxbarashada S2?

Xulashada cadadka waxbarashada waxaa saameyn ku leh oo kaliya aqoonta ardayga ee afka finnishka oo la barbardhigayo aqoonta afka finnishka ee ay ardayda da'diisa ah ugu baahan yihiin dugsi-dhigashada. U soo bixidda cadadda waxbarashadu saamayn kuma lahan ka qaybqaadashada barashada afka hooyo ama luqada af hooyo ahaan ardayga ugu qoran nidamaka macluumaadka dadka. Inkastoo afka hooyo ee ardayga u qoran uu yahay finnish, waxaa laga yaabaa in ardaygaas loo soojeediyo cadadda waxbarashada S2 iyadoo lagu salaynayo qabyanimada aqoontiisa luqadeed. Cadadda waxbarashada S1 waxaa la soojeedin karaa in la qaato iyadoo lagu salaynayo aqoonta luqadeed oo ku filan, in kastoo uu afka hooyo ee ardaygu yahay af kale oo aan finnish ahayn.

Tusaalooyin kale oo ku saabsan sida, nooca xaaladaha inta badan marka lagu jiro ardayga loo soojeediyo cadadda waxbarashada S2:

- Ardaygu ma awoodo in uu isgaarsiin ahaan afka finnishka si fiican ugu sameeyo xiriir marka uu ku jiro xaaladaha caadiga ah ee dugsi
- Ardayga waxaa ku adag in uu afka finnishka kula socdo barashada maaddooyinka kala duwan iyo waxqabadka dugsi
- Ardaygu wuxuu marka lagu jiro xaaladaha caadiga ah si fiican ugu hadlaa afka finnishka, laakiin aqoontiisa afku weli kuma filna fahamka qoraallada maaddooyinka kala duwan ama soo saarista qoraallada
- Ardaygu si fiican uma akhriyo/qoro afka finnishka marka loo eego da'diisa, si uu iskiis wax ugu barto uga qaybqaato waxqabadka dugsi.

Ardaygu si fiican ayuu finnishka u yaqaan, maxay tahay sababta loogu soojeedinayo barashada S2?

Inta badan waxaa jawaabta laga helaaa farqiga u dhexeeya aqoonta luqadeed ee isgaarsiinta ah iyo tan akadeemigga ah. Aqoonta luqadeed ee isgaarsiinta ah wuxuu qofka ku hadlaa u isticmaalaa xiriirka caadiga ah, qofka ku hadlaahina wuxuu inta badan ka hadlaa arrimo la taaban karo wuxuuna isticmaalaa jumlado fudud. Aqoonta luqadeed ee isgaarsiinta waxaa lagu yeelan karaa labo sannadood.

Markasta oo ay dugsi-dhigashadu kor u sii socoto, waxaa loo sii baahanayaa maareynta xaaladaha isticmaalka luqadeed ee kala duwan ee maaddooyinka iyo luqada oo sidi hore ka adag. Waxaa fasallada sare loogu baahanyahay luqad ay ku jiraan oraahyo ka hadlaya waxyaabaha aan la taaban karin, aragtiyo la xiriira aqoonta qoraallada iyo maaddooyin kala duwan iyo noocyada qoraallada. Gaarista aqoonta luqadeed ee akadeemigga ah waxay inta badan qaadataa shan illaa iyo todobo sannadood.

Waalidka ayaa gaaraya go'aanka xulashada cadadda waxbarashada oo ku salaysan macluumaadka la siiyay

Waalidka iyo macallinka ayaa ka qaybqaadanaya xulashada cadadda waxbarashada ee maaddada afka hooyo suugaanta (S2 ama S1). Macallimiinta ayaa ogaanaya cadadda waxbarasho ee sidi ugu fiican u taageereysa waxbarashada ardayga kaddibna waalidka u soojeedinaya. Si kastaba ha ahaatee waalidka ayaa gaaraya go'aanka. Sababta loo cuskado cadadda waxbarashada ku filan waa aqoonta luqadeed ee ardayga iyo shuruudaha luqadeed ee ay waxbarashada da'diisu u baahantahay. Aqoonta ardayga waxaa lagu hubinayaa dhammaan qaybaha ay aqoonta luqadu ka koobantahay.

Xulashada cadadda waxbarashadu waa mid wakhti dheer soconaysa, laakiin marka ay aqoonta samayso horumar ku filan waxaa cadadda waxbarashada S2 loo beddeli karaa islamarkaasna ay fiicantahay in loo beddelo cadadda waxbarashada S1. Markaas waa in aqoonta ardayga laga hubiyaa qaybaha kala duwan ee aqoonta luqada. Macallimiinta ayaa waalidka u sheegaya waxa ay yihiin hadafyada cadadda waxbarashada S2, sida waxbarashada loo hirgelinayo iyo sababta ay ardayga muhiimka ugu tahay.

Waxbarashada finnishka oo sidi luqada labaad ah ma ahan waxbarasho ka caawin. Barashada cadadda waxbarashada S1 iyo S2 waxaa loo xajiyay saacado isku tiro ah. Ardayga dhigta cadadda waxbarashada S2 sidoo kale ardayga dhigta S1 wuxuu maalin-dugsiyeedka kaddib heli karaa caawimaadda waxbarashada ee maaddooyinka kala duwan, haddii uu u baahanyahay. Iyadoo kaalmaysanaysa waxbarasho ka caawinta ayeey macallimaddu ka caawinaysaa ardayga gaarista hadafyada qorshaha waxbarashada.

cadadda waxbarashada S2 iyo sii wadashada waxbarashada

Waxaa jirta fursad machadyada xirfadda iyo dugsiyada sare looga baran karo finnishka oo sidi luqad labaad oo kale ah. Haddii aqoonta luqadeed ee ardaygu aanay weli ku filnayn ka qaybqaadashada waxbarashada xirfadda ama dugsiya sare, wuxuu ardaygu codsan karaa waxbarashada diyaarinta ah ee sii wadashada waxbarashada (TUVU, laga billaabo deyrta 2022), taas oo hadafkeedu yahay xoojinta aqoonta luqada iyo aqoonta waxbarashada ee loo baahanyahay. Waxaa jirta fursad dhammaadka waxbarashada dugsiya sare lagu samayn karo imtixaanka dugsiya ee finnishka oo sidi luqad labaad ah.

Maamulka waxbarashadu wuxuu soojeedinayaa in waxbarashada S2 iyo S1 si isku mid ah loola macaamilo marka la codsanayo dugsiyada tacliinta sare. Hadafku waa, in aan lagu kala saarin nooca ay tahay cadadda waxbarasho ee uu ardaygu ka qaybqaatay. Nidaamka helitaanka buundooyinka ee dugsiyada tacliinta sare waa ay isbedbeddelaan, sidaas darteed waxaa wanaagsan in xaaladda markaas taagan laga hubiyo tusaale ahaan hagaha waxbarashada.

Waxbarashada, la socoshada aqoonta luqadda iyo beddelista cadadda waxbarashada

Waa muhiim in macluumaadka laga uruuriyay horumarka luqadeed ardayga loo wareejiyo macallimiinta cusub, marka uu ardaygu billabay, beddelanayo kooxda waxbarashada ama dugsiya ama macallinkiisa la beddelo. Marka ay macallimaddu horay ka haysato macluumaadka ku saabsan heerka aqoonta luqadeed, waxyaabaha uu ardaygu ku fiican yahay iyo baahiyaha taageero ee laga yaabo in uu ardaygu qabo, waxay ardayga u qorshayn kartaa waxbarashada ugu habboon ardayga. Waxaa aad muhiim u ah, in marka lagu jiro wareejinta macluumaadka waxbarashada la xaqiijiyo sii socoshada aan kala joogsi lahayn ee horumarka luqadeed ee ardayga.

Macallinka S2 iyo macallinka fasalka ama horjoo-gaha fasalku waxay u kuurgelayaan dukumentiyada ardayga tusaale ahaan qiimeynta aqoonta luqada ee lagu qoray qorshaha waxbarashada ama haddii loo baahdo waxay ka salgaarayaan aqoonta luqadeed ee ardayga. Waxaa kale oo ay inta lagu jira waxbarashada aasaasiga ah la soconayaa horumarka aqoonta luqada ee ardayga. Iyadoo lagu salaynayo horumarka qaybaha kala duwan ee aqoonta luqada ayaa la hubinayaa ku habboonaanshaha cadadda waxbarashada ee afka hooyo iyo suugaanta ee ardayga (S1 ama S2) haddii loo baahdana waa la beddelayaa.

Haddii ay macallimiintu go'aansadaan iyadoo waxyaabaha ay arkeen ku salaynaya soojeedinta beddelista cadadda waxbarashada, waxaa arrintaas lagala hadlayaa ardayga iyo waalidka. Waalidka ayaa saxiixaya foomka beddelista cadadda waxbarashada, haddii uu la qabo aragti beddelista cadadda waxbarashada. Waalidku wuxuu codsan karaa in loo sababeeyo, sababta cunnuggiisa loogu soojeediyay cadad waxbarasho. Waxaa kale oo uu waalidku codsan kartaa, in macallimiintu ay hubiyaan ku habboonaanta cadadda waxbarasho waxayna u sheegayaan argtida ah, in beddelista cadadda waxbarasho ay tahay mid mudan in la soo jeediyo.

Si kastaba ha ahaatee waa suuragal in cadadda waxbarashada la beddelo inta lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah, si kastaba ha ahaatee ma ahan suuragal mar haddii la gaaro fasalka sagaalad. Xulashada cadadda waxbarasho asal ahaan waa mid wakhti dheer jirta, si sii socoshada ay horumarka aqoonta luqadeed ay u ahaato mid dhowrsan. Qiimeynta maadada afka hooyo iyo suugaantu waxay ku salaysantahay hadafyada cadaddeeda waxbarasho ee uu ardaygu bartay.

Waxbarashada cadadda waxbarasho ee S2 waxaa dugsiya loogu qabanqaabin karaa habab kala duwan oo ku xiran marxaladda uu marayo horumarka aqoontiisa luqadu iyo taageerada luqadeed ee uu baahanyahay. Ardayga barta cadadda waxbarasho ee S2 wuxuu tusaale ahaan ha badnaato ama ha yaraatee wax la baran karaa kooxda ardayda barata S1. Habraacyada dugsiyada ee hirgelinta waxbarashadu waa ay kala duwan tahay. Horay waxaa loo sharraxay, hababka kala duwan ee loo hirgeliyo waxbarashada S2.

Cadadda waxbarashada S2 ee ku jira qorshaha waxbarashada

Hadafyada cadadda waxbarashada ee finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta ee ku jira qorshaha waxbarashadu waa kuwa lamid ah ama ku jiho ah cadadda waxbarashada ee luqada finnishka iyo suugaanta. Si kastaba ha ahaatee ardayda qaadata cadadda waxbarashada S2 lagama doonayo dhammaan aqoonta laga doonayo ardayda S1.

Hawsha gaarka ah ee cadadda waxbarashada S2 waa horumarinta aqoonta luqadeed iyadoo lagu xisabtamayo heerka luqadeed ee ardayga iyo taageeridda aqoonsiga luqadaha badan iyo aqoonta. Hadafku waa in ardaygu gaaro aqoon luqadeed oo ku filan barashada maaddooyinka kala duwan iyo sii wadashada waxbarashada (waxbarashada xirfadeed, dugsiya sare, dugsiya tacliinta sare). Waxbarashadu waxay ardayga siinaysaa agab uu si joogto ugu horumariyo aqoontiisa luqadeed xittaa noloshiisa dambe.

Waxbarashada S2 waxaa lagu xoojinayaa sawirka wanaagsan ee uu ardayga farriin-diraha naftiisa ka bixinayo waxaana looga caawinayaa isaga in uu garto waxyaabaha uu ku fiican iyo in uu luqada si geesinimo leh u isticmaalo. Qoraallada ku jira waxbarashada S2 waa ku loo xulay hab waafaqsan aqoonta luqadeed ee ardayda. Xiisadaha S2 waxaa hab nidaamka loogu ballaarinayaa keydka eryada waxaana looga hadlayaa micnaha iyo farqiiga erayada iyo oraahyada waxaana la is barbardhigayaa habab oraahyada ee luqadaha kala duwan.

Mowduucyada waxbarashada S2 waa tusaale ahaan qoraallada maaddooyin iyo warbaahinno kala duwan, nolosha shakhsiga ah, nololmaalmeedka dugsiya, iyo ku dhex shaqaynta bulshada. Sidan ayuu afka finnishku ugu ballaaranayaa xittaa dugsiya bannaankiisa. Ardaygu waxaa lagu hagayaa in uu aragtiidiisa iyo dareenkiisa u sheego hab ku habboon iyo in uu akhriyo qoraallo kala duwan, sida buugaagta.

Hababka hirgelinta waxbarashada S2

Macallimiinta S2 iyo macallimiinta kale waxay wadashaqeyn ka yeelanayaan waxbarista maaddooyinka afka hooyo suugaanta ee cadadda waxbarasho ee kala duwan. Waxbarashada S2 waxaa inta badan la qabanqaabiyaa isla wakhtiga waxbarashada S1, yavni inta lagu jiro xiisadaha waxbarashada afka hooyo iyo suugaanta. Si wadajir ah ayeey ardayda labada cadad waxbarasho wax u baran karaan.

Haddii uu hal macallin bixinayo waxbarashada, wuxuu uga fekerayaa si waafaqsan waxbarashada, agabka waxbarashada, shaqooyinka iyo qiimeynta iyo hadafyada cadadda waxbarasho ee S2 iyo S1 iyo heerka aqoonta luqada ee ardayda. Mararka qaar labo macallin oo tusaale ahaan kala ah macallinka fasalka iyo macallinka S2 ayaa iskumar fasalka wax ku bari kara. Markaas wuxuu macallinka S2 qaadayaa mas'uuliyadda waxbarashada waafaqsan cadadda waxbarashada S2.

Mararka qaar waxaa loogu talagagalay in macallimadda S2 ay qayb ka mid ah waxbarashada S2 ku barto koox gaar ah, markaas oo waxbarashada lagu jiihaynayo qaybta aqoonta luqadeed ee ay ardaydu u baahan yihiin. Iyadoo aan ku xirnayn kooxda waxbarasho ee uu ardaygu ku qaatay waxbarashada waafaqsan cadadda waxbarasho ee S2, waxaa aqoontiisa iyo horumarkiisa loo qiimeynaynaa hab waafaqsan hadafyada qorshaha waxbarashada ee cadadda waxbarashada S2. Qiimeynta waxaa wadajir u samaynaya macallimiinta ardayga waxbartay.

Kan soo socda waxaa lagu qoray tusaalooyinka ku saabsan, sida dugsiyada looga hirgeliyo waxbarashada S2. Ardaygu wuxuu si waafaqsan baahiyihiisa waxbarasho uga qaybqaadanayaan waxbarasho habab kala duwan loo hirgelinayo oo barbar socota habsami-socodka dugsiyiisa.

- 1.) **Waxbarashada gaarka laga dhigay inta lagu jiro xiisadda afka hooyo iyo suugaanta**
Hal macallin ayaa isku xiisad wax ka dhigaya casharo waafaqsan hadafyada S1 iyo S2. Ardaygu wuxuu helayaa agab waxbarasho iyo layliyo ku habboon heerkiisa.
- 2.) **Waxbarasho isku wakhti ah**
Macallinka S2 iyo macallinka fasalka/macallinka S1 ayaa kooxda dhan isku wakhti waxbaraya waxayna ku xisaabtamayaan marka ay waxbarista ku jiraan cadadda waxbarashooyinka S1 iyo S2 iyo heerarka aqoonta kala duwan ee ardayda.
- 3.) **Koox qayb ahaan gaar ah**
Ardaygu wuxuu qayb waxbarashada kamid ah u qaadanayaa sidi waxbarasho la gaar yeelay marka lagu jiro xiisadda wadajirka ah ee afka hooyo iyo suugaanta ee cadadda waxbarashada iyo qayb kale oo uu si gaar ah ugu qaadanayo kooxda S2. Marka lagu jiro xiisadda wadajirka ah, hal macallin ayaa ku xisaabtamaysa cadadda waxbarashada ee ardayda.
- 4.) **Kooxda S2 ee gaarka ah**
Ardayda baranaysa cadadda waxbarashada S2 waxay helayaa kooxdooda ku helayaa waxbarasho iyaga ku wajahan tusaale ahaan hal xilli ama fasal-sannadeed.
- 5.) **Waxbarashada isku wakhtiga ah oo luqad ahaan la taageerayo ee maaddooyinka kala duwan**
Marka lagu jiro xiisadaha maaddooyinka kala duwan waxaa waxbarista ka qaybqaadan kara ka sokow macallinka fasalka/maaddada macallinka S2 Markaas hadafyada waxbarashadu waa hadafyada cadadda waxbarashada S2 iyo maaddada tusaale ahaan aqoonta qoraallada ee maaddada.

Luqado badnaanta dugsiya dhexdiisa

Sida uu qabo sharciga waxbarashada aasaasiga ah, luqada loo isticmaalayo waxbarashada aasaasiga ah waa finnish ama (waxbarashada ku baxaysa afka iswiidhishka) iswiidhish. Aqoonta afka finnishka ama iswiidhishka oo xooggan ayaa muhiim u ah dhammaan waxbarashada. Waxaa kale oo waxbarashada looga faa'iidayaan karaa luqadaha kale. Marka uu ardaygu dhinacyo badan ugu isticmaali uguna horumarin karo luqadaha uu yaqaan guriga, dugsiya iyo wakhtigiisa firaqaada, waxay ka caawinaysaa barashada luqadaha iyo maaddooyinka kale.

Ardayda luqadaha badan waxay luqadaha ay yaqaanaan dugsiya ugu isticmaali karaan caawimaadda waxbarashadooda. Marka lagu jiro xiisadaha maaddooyinka kala duwan waxay ardaydu fursad u haystaan in ay qaamuuska luqada ay yaqaanaan ka raadiyaan macluumaadka, erayada muhiimka ah ee maaddada iyo in ay mowduuca xiisadda uga hadlaan luqad aan finnish ahayn. Waalidkuna waxay carruurtooda guriga kula isticmaali karaan luqada ay ku hadlaan marka ay ka hadlaan maaddooyinka kala duwan.

Aqoonta war isweydaarsiga ee labo luqadood ama wax ka badan si fiican la iskula xiriiri karo marka lagu jiro xaalado kala duwan waxaa loogu yeeraa luqado badnaan waxqabad leh. Marka lagu jiro luqado badnaanta waxqabadka leh luqadaha kala duwan ee ardaygu uma shaqeeyaan sidii kuwa gebi ahaan kala gaar u ah sida, in hal luqad ay tahay luqada guriga tan labaadna ay tahay luqada dugsiya iyo bulshada, ee luqad kasta waxaa qayb ahaan loo isticmaali karaa xaaladaha kala duwan. Hadafka waxbarashadu waa xoojinta luqado badnaanta waxqabadka leh ee ardayda.

U guurgelidda luqadaha kala duwan iyo isbarbardhigoodun wuxuu horumariyaa awoodda lagu aqoonsado islamarkaasna lagu barto arrimaha luqada la xiriira. Iyo sidoo kale u kuurgelidda noocyada kala duwan ee isla luqada. Luqadaha iyo qaybahooda oo si isku qiimo ah looga halo waxay meesha ka saaraysaa iska sii necbaanshaha laga qabo luqadaha/nooca luqadaha iyo dadka ku hadla (tusaale ahaan ingiriiska Boqortooyada Ingiriiska iyo ingiriiska Maraykanka ama noocyada kala duwan ee afkaada hooyo).

Waa muhiim in uu ardaygu si joogto ah u horumariyo aqoontiisa luqada finnishka iyo luqadaha kale ee uu ku isticmaalo guriga iyo wakhtiyada firaqaada. Ka qaybqaadashada waxbarashada afka hooyo waa mid wax ku ool ah. Luqada oo guriga kaliya lagu isticmaalo ma ahan mid inta badan ku filan, in aqoonta luqadeed ee ardaygu ay horumarto hab dhinacyo badan. Marka uu ardaygu wax ku baranayo luqad uu yaqaan, kalsoonida uu ku qabo awooddiisa waxbarashadu ayaa xoogaysanaysa.

Doorka waalidiinta ee taageeridda aqoonta luqadda Sare u qaadidda afkaada

Horumarinta iyo gacan ku haynta afka hooyo waxaa asal ahaan mas'uul ka ah waalidka. Qoysaska ay waalidku kala leeyihiin afaf hooyo oo kala duwan, wuxuu waalid kastaba isticmaali karaa luqadiisa.

Tilmaamidda khaladaadka ama ku qasbidda in lagu hadlo luqad cayiman ma ahan mid caawinaysa horumarka luqada gaar ahaan carruurta yaryar, sababtoo ah carruurta weli ma lahan awood ay hab lamid ah ugu gartaan isticmaalka luqadooda. Waxaa ku filan, in qofka weyn uu habka saxda ee hadalka cunugga uu ku celiyo islamarkaasna uu si nidaamsan u isticmaalo luqadiisa.

Muhiimad sidaas u weyn uma lahan horumarka luqadaha, luqada uu cunuggu tusaale ahaan marka hore barto akhrinteeda. Waxa ugu muhiimsan waa, in aqoonta la barto laguna tababarto. Waxaa wanaagsan in cunugga la siiyo waxyaabo dhiirigelin leh oo dhinacyo badan (buugaag, muusig, fiidiyow, waxqabad) luqadiisa. Haddii aan la heli karin agabkaas, waxaad beddelkooda isticmaali kartaa agabyada luqadaha kale (tus. afka finnishka). Waxaa kale oo cunugga habkan lagu siinayaa fursad uu isku barbardhigo kuna garto luqadaha kala duwan. Waa iska caadi in qoyska luqadaha badan isku wakhti laga dhex maqlo luqado kala duwan.

Aqoonta luqada guriga lagu isticmaalayo waxay noqon kartaa mid yar, haddii aan xoogga la saarin horumarka luqada. Ka qaybqadaashaa barashada afka hooyo waxa fursad muhiim ah oo dhinacyo badan loogu horumarin karo keydka eryada iyo oraahyada iyo aqoonta luqadeed.

Talooyinka taageeraya afka hooyo

- Ka diiwaangeli cunuggaada waxbarashada afkiisa hooyo, haddii ay suuragal tahay.
- Ka faa'iidayso agabka laga helo [maktabadda Helmet](#) iyo [maktabadda luqadaha badan](#) ee ku qoran luqada qoyska.
- La fiirsada cunugga barnaamijyo kala duwan wadajirna uga faallooda, waxyaabaha barnaamijyada ku jira inta la daawanayo iyo daawashada kaddib.
- Kula ciyaar ciyaaro, kula hees, kula dheel kulana sheekeyso afkiisa- hooyo. Khaasatan, kula dheelista luqada, kaftannada iyo kaftan erayeedyada kala duwan waxay horumariyaan luqada.
- Luqadaada kula sheekeyso cunugga luqadaada, marka aad weydiinayo waxyaabaha uu cunuggu sameeyay markii uu meel kale joogay. Khaastan waxaa wanaagsan in dugsiga lagala sheekeysto, si cunuggu uu luqadiisa ugu barto erayada lala xiriira nolosha dugsiga.
- Iskuday in aad hesho qoysas ama dad aad isku luqad tihiin kaddibna qabanqaabiya waxqabad wadajir ah, tusaale ahaan kulamo ka dhacaya maktabadaha. Magaalada Helsinki waxay bixisaa goobo badan oo lacag la'aan wakhtigooda looga qabsan karo [bogga Varaamo](#).
- Waayahan waxaa jirta fursad carruurta loogu qabanqaabin karo waxbarasho fogaa arag ah, dalal badan ayaa habka fogaan aragga ah u bixiya waxbarashada luqada oo lacag la'aan ah. Hubiya, in waxbarashadaas la heli karo.
- Iskuday in aad hesho hiwaayado ku baxaya afkaada hooyo. Bulsho luqadeed isku midka ah waxaa laga heli karaa hiwaayad, macallin, hage ama tababare.
- Qaab tusaale ah ugu tilmaan carruurta, in luqado badnaantu ay tahay qaninimo habab badan looga faa'iidayso karo.

Taageeridda aqoonta afka finnishka

Waalidku wuxuu cunuggiisa ka caawin karaa kana taageeri karaa barashada finnishka, mana ku xirna sida ay tahay aqoontiisa afka finnishku. Iyadoo muujinaya xiisaha iyo qiimeynta ay u hayaan waxbarashada afka finnishka iyo wax ku barashada afka finnishka ayeey waalidku sheegi karaa muhiimadda arrinkan leeyahay. Waxaa intaas dheer in waalidku ay carruurta wakhtiyada firaqada ku hagi karaa waxqabadyada horumarinaya luqada finnishka. Cutubkan waxaa ku jira waxoogaa talooyin ah oo arrintaas la xiriira.

Aad ayeey muhiim u tahay, in waalidku uu tusaa-lihiisa ku tuso cunugga, in ay wanaagsan in luqada cusub lagu horumariyo si geesinimo lehna loo isticmaalo, sababtoo ah luqadu waxay ku xoogaysataa in la isticmaalo oo kaliya. Tan waxaa loola jeedaa, in marka luqad la baranayo ay tahay in isticmaalkeeda lagu barto xaalado kala duwan, balse aan la sugin inta ay aqoonta luqado ka noqonayo "mid aad u fiican".

Waxaa wanaagsan in cunugga lagu dhiirigeliyo wax ku akhrinta afka finnishka. Akhrintu waxay si xooggan u horumarisaa aqoonta luqada aqoonta wax akhrinta ee wanaagsanna waa mid muhiim u ah dhammaan waxbarashada. Haddii uu waalidku ka welwelsanyahay horumarka aqoonta luqada finnishka ee cunuggu, waxaa wanaagsan in dugsiga lala xiriiryo islamarkaasna talo laga codsado.

Ku tababarashada luqada finnishka waxaa u wanaagsan, in cunuggu uu leeyahay asxaab luqadaha ka dhexeysa ay tahay finnishka. Qasab ma ahan in saaxiibku noqdo dhalad afka finnishka ku hadla. Hiwaayado kooxeedka afka finnishka ku baxa ayaa sidoo kale (jimicsiga, akhrinta, muusigga, ururka dhallinyarada iwm) faa'iido u noqon kara barashada luqada.

Waxaa kale oo la heli karaa fursado hiwaayadeedyo badan oo lacag la'aan ah

- Waxaa hiwaayado kala duwan laga codsan karaa [Bogagga hiwaayadaha](#). Waxaa kale oo halkan laga helaa hiwaayado badan oo aan lacag ahayn (lacag la'aan ah). Ururada qaar, tusaale ahaan [Pelastakaa lapset](#), ayaa hiwaayado bixiya.
- Guryaha dhallinyarada [ee magaalada Helsinki](#) iyo goobo waxqabad oo kala duwan lagu qoray bogga Harrastustoiminta. Waxaa jirta fursad guryaha dhallinyarada dhexdooda lagula samayn karo hiwaad ama wakhti lagula qaadan karo carruurta iyo dhallinyarada kale iyadoo lagu joogo bey'ad ammaan ah.
- [Jardiinooyinka ciyaartu](#) waxay dadka kayar 16 sano u qabanqaabiyaan waxqabadyada xagaaga oo kala duwan iyo qado lacag'aan ah.
- [Xerooyinka xagaagu](#) waa bogga ka dhexeeya ururada carruurta iyo dhallinyarada Finland ugu qabanqaabiya waxqabadyada xerooyinka.
- [Mutadawacnimo](#) ayaa uga shaqayn kartaa kaligaa ama cunugga oo kula socda.
- Naadiyada jimicsiga da'da kala duwan ee lacag la'aanta ah, [Easysport](#)

Telefishinka (sidoo kale internetka) waxaa luqada looga baran karaa hab farxad leh

- [Yle Areena \(Areenada Carruurta, Pikku Kakkonen, Yle Galaxi\)](#)
- Isticmaal adeegyada Yle iyo filimada qoraal ahaan loo turjumay af finnish
- Iyadoo loo sii marayo warbaahinta bulshada (TikTok, Instagram, YouTube, boloogyada), waxay carruurta indha-indhayn karaan isticmaalka noocdyada badan ee afka finnishka iyo luqadaha kale.
- Afka finnishka ayaa la isticmaali karaa, marka asxaabta lala ciyaarayo ciyaaraha online:ka ah.

Maktabadaha iyo suugaanta:

- [Isticmaalidda buugaagta ku qoran luqadaha fasiixa ah](#) waxay caawin kartaa dhammaan dadka luqada baranaya, sababtoo ah luqada ay ku qoran yihiin ayaa ah mid fudud. Waxaa sidoo kale wanaagsan in lagu dhinac wado akhrinta suugaanta kale. Isla hal buug ayaa waxaa lagu akhrinta afkaada hooyo iyo afka finnishka.
- Maktabada ayaa sidoo kale bixiya [waxqabadyada xagaaga oo noocyo badan](#).
- Dibloomooyinka kala duwan (tusaale ahaan [Dibloomada akhriska ee finnishka oo sidii luqad qalaad ah](#)) ayaa dhiirigeliya wax akhrinta.

Agabka waxbarashada ee internetka ku jira ee taageeraya barashada afka finnishka

Laylisyada billowga iyo heerka aasaasiga ah ee loogu talaggalay carruurta iyo dhallinyarada

- [Bogga Puhutaan](#)
- [Papumarket](#)
- [Kooxda xiddigga - halyeeyada sare ee luqada](#) (agab la daabacan karo)

Laylisyada billowga iyo heerka aasaasiga ah ee loogu talaggalay dhallinyarada iyo dadka waaweyn

- [bogga suomitaskussa.eu](#)
- [Bogga Osaan suomea](#)
- [Bogga Supisuomea](#)
- [Finnishka dan-qabsashada ee Yle](#)
- [Bogga Ymmärnä suomea](#)
- [Laylisyada imtixaanka YKI](#)
- [Koorasyada shabakadda ee maktabadda oo kaarka maktabadda lagu gelayo](#)
- [Agabka waxbarashada – Käte Finnishka la isticmaalo, xittaa kuwa la dhegeysto](#)
- [Dhegeysiga buugaagta Suomen mestari](#) (waxay u baahantahay in la iska diiwaangeliyo)
- [Moninet](#)
- [Finnish Phrases](#)

Helsinki